

Macluumaadka ku saabsan tallaalka ku lidka ah COVID-19 ee haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya



Akhri warsidahan ka hor inta aan lagu tallaalin

Haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya waa laga tallaali karaa COVID-19.

Tallaalku khasab maaha oo waa bilaash.

Tallooyinka tallaalka haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya

Masuuliyiinta Caafimadka Dheenisku waxay ku taliyaan in haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinayo in laga tallaalo COVID-19. Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska talooyinkoodu waxay ku salaysan yihiin qiimaynta xirfadeed ka dib markii la sameeyay daraasado cilmiyeed, isku darka xogta sida tallaalku waxtar u leeyihiin iyo saamayn xun oo kasta oo ka timid iyada, iyo talada ka timid khabirada.

Gebagebada waa in ay badbaado tahay oo waxtarna u leedahay haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya in laga tallaalo COVID-19.

- Haddii aad uur leedahay, waxaanu ku talinaynaa xiliga uurka ee 2^{aad} ama 3^{aad}. Guud ahaan, dawada xiliga uurka 1^{aad} ee uurka laguma taliyo feejignaan ahaan.. Sababta tani waa in unugyada ay samaysmaan 12 todobaad ee koowaad.
- Haddii aad naas nuujinayso, si degdeg ah ayaa lagu tallaali karaa. Tani waxay ku habboon tahay iyaddoo loo eegin inta ay leeg tahay wakhtiga aad naas nuujisay ama marka aad dhashay.

Tallaalka ku lidka ah COVID-19 waxa uu badbaado u yahay haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya

Tallaalkan ku lidka ah COVID-19 waa kuwa wax yar iyo badbaado u leh haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya. Tallaalka laga bilaabo fizer BioNTech iyo Moderna waxay u ilaaliyaan si isku mid ah haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya sida ay dadka kaleba sameeyaan. Tallaalka haweenka uurka iyo kuwa naas nuujinaya waxay ku leeyihiin saamayn wanaagsan ilmaha, iyaddoo walax diidka jidhka hooyada waxaa loo gudbiyaa ilmaha iyaddoo maraysa dhiiga iyo caanaha naaska.

Haweenka uurka iyo kuwa naas nuujinaya waxay lahaan karaan saamayn xun oo isku mid ah sida kuwa kale tallaalka ka dib. Badanka xaaladaha ballaadhan, saamaynta xun way degen tahay. Saamayntan xun ee degen waxay noqon kartaa daal, madax xanuun iyo qandho, iyo caadi ahaan midka u dambeeya ama labba maalmood. Fal celinta xasaasiyada waxay dhici kartaa xaalado dhif ah.

Ma jirto khatarta kordhaysa oo dhiciska ah, foolxumo ku dhalasho ama dhalasho wakhtigeedka ka soo hor marta oo lagu arkay haweenka laga tallaalay COVID-19. Gudaha Maraykanka, waxay la socodeen haweenka uurka leh ee la tallaalay. Diiwaanka hadda waxaa ku jira in ka badan 100, 000 oo haween uurleh ah. May jirin saamaynta xun oo werwer oo lagu arkay halkan midna.

Ma jiro shaki in tallaalku gudbo uurjiifka iyaddoo maraysa mandheerta ama ilmaha yar iyaddoo maraysa caanaha naaska.

Masuuliyiinta caafimaadka si joogta ah waxay raacaan xogta ku saabsan sida uu tallaalku waxtar iyo badbaado u leeyahay, oo ma jiraan tilmaamo in tallaalka ku lidka ah COVID-19 ay khatar kordhaysa ku tahay miduun hooyada ama ilmaha.

Haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya waxaa la siiyaa tallaalka gudaha Maraykanka iyo badanka wadamada Yurub.

COVID-19 haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya

Safmarku waxa uu la sii socdaa isagoo wata noocyo cusub oo kala duwan oo korona fayras ah. Sidaas awgeed waa muhiim in dad badan sida suuragalka ah la tallaalo -- gaar ahaan kuwan khatarta sare ugu jira.

Badanka haweenka uurka leh iyo kuwa naas nuujinaya keliya waxay la kulmaan astaamo degen haddii ay qaadaan korona fayraska cusub. Si kastaba ha ahaatee, haweenka uurka leh qaarkood waxay khatar u geli karan inay noqdaan kuwa aad ugu jiran COVID-19.

Daraasadaha dalka dibadiisa ah waxay gaadheen in haweenka uurka leh ee qaba COVID-19 ay ugu dhawaan labba jeer khatar ugu jiraan in cusbitaal la dhiga gudaha qaybta daryeelka degdeg ah. Daraasadaha sidoo kale waxay muujinayaan in hooyooyinka qaba COVID-19 ay 2-3 jeer khatar sare ugu jiraan inay dhalaan ilma wakhtigiisa ka hor dhasha ama inay u baahdaan qaliinka uurka degdeg ah. Khatarta in si darran loogu jiranaado COVID-19 aad ayay u saraysaa haddii aad sidoo kale qabto xaaladaha sida cudurka sonkorta, xiiqda, cudurada wadnaha, ay buuran yihiin ama ka wayn yihiin 35 sano jir.

Sida haweenka isku da'da ah, haweenka naas nuujinaya waxay leeyihiin khatar hoose inay si darran ugu jiranaadaan COVID-19.

Sida loo qabsado ballanta

Ku sii qabsso ballantaada tallaalka addoo ku soo gelaya www.vacciner.dk NemID gaaga. Haddii aad u baahan tahay qabsashada ama beddelka ballantaada, Gobolkaaga ayaa ku caawin kara. Waa in lagu tallaalo mar labbaad ama aad haysato ilaalinta buuxda ee tallaalka.

Macluumaadka dheeraadka ah iyo talada

Fadlan ka hel macluumaad badan oo ku saabsan tallaalka ku lidka ah COVID-19 xaga websaydka Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska. Haddii aad uur leedahay, waxaad talo ka heli kartaa umulisadaada ballantaada labbaad. Haddii aad naas nuujinayso, waxaad talo ka heli kartaa booqdahaaga caafimaadka.



Websaydka
Masuuliyiinta
Caafimaadka
Dheeniska

Ma doonayo in la itallaalo

Haddii aad uur leedahay ama aad naas nuujinayso oo aanad doonayn in lagu tallaalo, waa muhiim in aad raacdo talada Masuuliyiinta Caafimaadka Dheeniska ee ku sabasan hortagga caabuqa. Ka dib waxaad ka ilaalin kartaa naftaada iyo ilmahaaga.

Weli waxaad haysataa doorashada in lagu tallaalo mar dambe.

Sii wad inaad raacdo talada ka hortagga caabuqa – gaar ahaan haddii aanad tallaalnayn



Guriga joog oo is baadh haddii aad qabto astaamaha



Ilaali masaafadda



Fur daaqadaha iyo albaabada oo hawo u fur gurigaaga si caadi ah



Dhaq gacmahaaga badanaa ama isticmaal nadiifiyaha gacanta



Nadiifi gurigaaga inta badan, gaar ahaan oogooyinka ay dad badan taabtaan